

 <p>Tucson Unified School District  <b>TUSD</b>  <i>Celebrate the U.S!</i></p> <p>Tucson, Arizona  <b>XEERKA UJEEDDOOYINKA</b>  <b>POLICY REGULATION</b></p>	<p><b>CINWAAN XEER: U-Oggolaan Dugi</b>  <b>Ardeyda Guri-la'aanta ah</b></p> <p><b>KOODH: FABD – R</b></p> <p><b>WAAXDA HOGGAAN:</b>  <b>Hoggaan Waxbarasho</b></p>
---------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------	-----------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------

### **U-Oggolaanta**

Dugsiga u doorto ardeyga guri-la'aanta ku jira ayaa si dhakhso leh ugu oggolaan dugsiga ardeyga, xataa haddii ardeygaasi uu la iman waayo wax caddeyn diwaan gal ah oo markaa looga baahan yahay qoritaanka dugsiga, ooy ka midka yihiiin diiwaan galin waxbarasho hore, tallaalka, caddeyn ta meel deggannansho, caddeyn ta dhalashada, ama dukumeentiyo kale. Dugsiga cusbi waa in uu isla markaaba wargaliyaa waalidka/wakaaladda in u ardeygu xaq u leeyahay in uu ku sii jiro dugsigii horey uu ugu jirey oo la siin doono gaadiid lagu qaado.

Dugsiga ardeyga qoraya ayaa isla markaaba la xidhiidhi doona dugsigii ugu danbeeyey ee ardeygu u ka dhigan jirey sidii ay uga heli lahaayeen diwaan galinta waxbarsho, caafimaad iyo arrimaha kale ee khuseysa.

Haddii u ardeygu u baahato inuu helo tallaal, ama diiwaan galka tallaalka ama caafimaadka, dugsiga ardeyga qoraya ayaa isla markaaba ku hagaajin doona waalidka ama masu'uulka ardeyga caafimaad kalkaaliyaha (nurse) oo ka caawin doona tallaalka ama diiwaan galka tallaalka ama caafimaadka markaa loo baahan yahay

### **Is-Khilaafyada U-Oggolaanta Dugi**

Haddii khilaaf ka yimaad arrinta doorasha dugsiga ama is-qorka dugsiga:

- Ardeyga isla-markaaba waa loo oggolaan dugsiga u ardeygu ka raadsadey is-qoritaanka, iyada oo la sugayo xallinta khilaafka.
- Waalidka ama masu'uulka ardeyga ayaa loo fidin faahfaahin qoran oo ah go'aanka dugsiga ee ku saabsan doorashada dugsiga ama dugsi is-qorka, ooy ku jirto xuquuqda waalidka, masu'uulka, ama rafcaan in loo qaato go'aanka
- Ardeyga, waalidka, ama masu'uulka ayaa lagu hagaajin doonaa qofka u qaabbilsan ardeyda guri-la'aanta ku jirta, Agaasimaha Adeegyada Beesha Dugsiga, oo markaa fulin doona nidaamka xallinta khilaafka si deg-deg ah marka ay helaan ogeysiis ku saabsankhilafka, iyo
- Marka ay tahay qofka dhalinta ah een la wehelin, qofka u qaabbilsan ardeyda guri-la'aanta ku jirta, Agaasimaha Adeegyada Beesha Dugsiga, ayaa hubin doona in ardeyga si dhakhso leh lo qoro dugsiga iyada oo isla markaa laga war sugayo xallinta khilaafka

### **Go'aanka Dugi Qoritaanka**

- Diwaan-galiyaha/shaqaalaha xafiiska ayaa isla markaaba la xidhiidhi qofka u qaabbilsabsan ardeyda guri-la'aantu ku jira, Agaasimaha Adeegyada Beesha Dugsiga, ayaa eedi in ardeygu yahay McKinney Vento.

- U qaabbilsanaha ayaa u tilmmaami dugsiga marka ardey lo qori doono ahaan McKinney Vento.

La ansixiyey: march 8, 2005

Dib looga shaqeeeyey:

Sharci Tix-raac:

Iskaga-gudub Tix-raac:

Waxa u beddleyaa Ujeeddooyinka TUSD #